

COVID-19

Baadhista Dugsiga

Ma leedahay MID ama ka badan calaamadaha soo socda oo cusub ama ka sii daraya?



Qandho $\geq 37.8^{\circ}\text{C}$ ama qadhqadhyo



Muruqo xanuun iyo/ama kala-goys xanuun (dadka waaweyn)



Ur ama dhadhan la'aan



Qufac



Neef qabatow



Lallab ama matag, shuban (carruurta)



Daal badan (dadka weyn)

Haddii aad qaadatay tallaalka COVID-19 48-kii saacadood ee la soo dhaafay oo aad yeelatay xoogaa ah murqo xanuun iyo/ama kala-gosyo xanuun, madax-xanuun oo bilaabmay tallaalka kadib oo aadan lahayn calaamad kale kaga jawaab "Maya" su'aalahaas.

Bixiyaha daryeelka caafimaadka, qaybta caafimaadka dadweynaha ama barnaamijka COVID Alert ma kuu sheegay inaad hadda iskarantiisho ama aad guriga joogto?



10-kii maalmood ee la soo dhaafay, ma lagu aqoonsaday inaad "xiriir dhow" u ahayd qof qaba COVID-19? Haddii aad si buuxda isu tallaashay* ama aad hore u qabatay**, aanad lahayn calaamado oo aan lagu sheegin inaad iskarantiisho, ku jawaab "Maya".



14kii maalmood ee aan soo dhaafnay, ma u socdaashay dibedda Canada oo ma lgugula taliyey karantiimo, ama in aanad tegin dugsiga?



Ma jiraa qof aad la nooshahay oo hadda dareemaya astaamo cusub oo COVID-19 ah iyo/ama sugaya natiijooyinka baaritaanka? Haddii aad si buuxda isu tallaashay* ama aad hore u lahayd ** oo aanad lahayn astaamo oo aan lagu tilmaamin inaad iskarantiisho AMA haddii astaamaha qofka ay la xiriiraan qaadashada tallaalka COVID-19 48-kii saac ee la soo dhaafay, ku jawaab "Maya".



10-kii maalmood ee la soo dhaafay, ma ka heshay natiijo togan baaritaanka antijiin ee degdegga ah ama xirmada ku salaysan is-baaritsata ee guriga? Haddii aad tan iyo markaas lagaa waayay baaritaanka shaybadhka ee ku salaysan PCR, ku jawaab "Maya".



Haddii aad kaga jawaabtay HAA mid ka mid ah su'aalaha sare ama aad dareemayso xanuun, fadlan guriga joog. Haddii aad leedahay calaamado ama aad tahay xiriir dhow, isbaadh iyo/ama la hadal bixiyahaaga caafimaadka.

* **Si buuxda u tallaalan** macnaheedu waa inaad heshay dhammaan qiyaasaha loo baahan yahay ee tallaalka COVID-19 ee la oggolaaday ugu yaraan 14 maalmood kahor.

Eeg boggayaga internetka si aad u hesho macluumaad faahfaahsan.

****Hore u qabay** macnaheedu waa inaad qabtay COVID-19 90-kii maalmood ee la soo dhaafay, waad bogsatay, oo waxaad dhammaystirtay muddadii is-go'doominta ee caabuqii hore.

Haddii difaacaagu hooseeyo, waa inaad raacdaa dhammaan tilmaamaha caafimaadka dadweynaha ee caadiga ah, xitaa haddii aad si buuxda isu tallaashay ama aad hore uga bogsatay COVID-19. Haddii aad su'aalo qabtid, la hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.